Faafinta Rasmiga (B.U.) L. 2 R. 11 ee 23 Noofember 1975

SHARCI L. 73 ee 21 Oktoobar 1975.

Sharciga Dhulka Beeraha

Qaybta 1

Gogoldhig Guud

1. *Caddeyn*. — Ereyada hoos ku qoran waxaa loola jeedaa sida soo socota:

1) "DHUL" Waxaa loola jeedaa dhul kasta oo wax lagu beero;

2) "RUQSAD" Waxaa loola jeedaa ku dhaqan dhulka beeraha muddo go'an;

3) "SHAHAADO" Waxaa loola jeedaa warqad lagu caddeynayo xaqa ku dhaqan dhulka;

4) "XOGHAYE" Waxaa loola jeedaa xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Beeraha;

5) "XEER NIDAAMIYE DAWLADEED" Waxaa loola jeedaa Xeer Nidaamiye Dawladeed ee lagu fasiri doono laguna fulin doona Sharcigan;

6) "QOYS" Waxaa loola jeedaa xaas ka kooban nin, naagtiisa iyo caruurtooda aan qaan gaarin;

7) "ISKAASHATO" Waxaa loola jeedaa Iskaashatooyinka Beeraha oo la aqoonsan yahay;

8) "QOYSKA" Waxaa loola jeedaa qofka mas'uul ka ah beeridda iwm. Dhulka la falaayo oo ruqsad leh iyo bixinta canshuurta beerta.

2. *Lahaanshad Dhulka*. — Iyadoo la tixgelinayo sida uu dhigayo sharcigan dhulka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya oo lagu dhaqmo ama yaan lagu dhaqmine waxaa iska leh Dawladda.

3. *Maamulka Dhulka*. — Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Beeraha wuxuu awood u leeyahay kormeeridda dhulka isagaana mas'uul ka ah maamulkiisa sida uu dhigayo sharcigan.

Qaybta II

Ruqsadda dhulka beeraha (Concession)

4. *Bixiinta Ruqsadda*. — Xoghayaha ayaa awood u leh inuu bixiyo ruqsadda dhulka beeraha siiyana Iskaashatooyinka, beeraha Dawladda (State Farms), Wakaaladaha Madaxa-bannaan, Dawladda Hoose iyo Beeraleyda gaarka ah, ha ahaadeen qof keligiis, qoys ama Shirkad; iyadoo la dhowrayo shuruudda lagu tilmaamay Sharcigan.

5. *Dhulkii horey loo haystay*. — 1) Dadkii horey dhulka beeraha haystay gidiigood waa iney ruqsad cusub weydiistaan Xoghayaha Wasaaradda Beeraha 6 bilood gudahood markii laga bilaabo taariikhda Sharcigan uu dhaqan galo si dhulka ay haystaan loogu diiwangeliyo.

2) Ruqsadda dhulka (Concession) aan la diiwangelin waa la tirtirayaa markii muddada kor lagu sheegay ay dhammaato.

3) Qodobkan kuma saabsana Iskaashatooyinka Beeraleyda oo lagu dhisay Sharciga L. 40 ee soo baxay 4-10-1973.

6. *Xadka bixinta ruqsadda*. — Qoys ama qof kasta waxaa la siin karaa hal ruqsad (concession) keliya. Lama oggola in la siiyo isla qoys ama qof keliya laba ruqso ama ka ; badan degmada uu deggen yahay ama degmo kale. Siddaasoo kale waa ay reeban tahay ruqsad dhulka la siiyo dad maqan.

7. *Muddada ruqsadda*. — Iyadoo la tixgelinayo sida uu dhigayo sharcigan muddada ruqsadda dhulka lagu bixinayo waxay noqon doontaa sida soo socota:

1) Beeraleyda gaarka ha ahaadeen Soomaali ama shisheeye (qof, qoys ansa Sharikadaha Beeraha ee Gaarka ah); muddada ruqsadda la siinayo waxay soconeysaa ilaa 50 sano o dib loo cusbooneysiin karo.

2) Ruqsassa la siinayo Iskaashatooyinka, Beeraha Dawladda, Wakaaladaha Madaxa-bannaan iyo Dawladaha Hoose wax mudda ah ee loo goynayo ma jirto.

8. *Xadka uu yeelan karo dhulka la bixinayo*. — 1) Xadka uu yeelanayo dhulka waraabka ah ee ruqsadda lagu bixinayo la siinayana qof ama qoys waxaa weeye 30 hektar, kan qalalanna waa 60 hektar marka laga saaro dhulka lagu beeri muuska iwm

2) Xadka uu yeelanayo dhulka lagu beero mooska iwm. (plantation land) ee ruqsad lagu bixinayo waa 100 hektar oo ku jiro dhulka wareegtada ah marka la siinayo hal qof ama qoys; kuwa la siinayana Shirkadaha gaarka ah ee beeraha, waxaa lagu soo sheegi doonaa Xeer-Nidaamiye Dawladeed.

3) Xadka kor lagu sheegay kuma saabsana beeraha Dawladda, Iskaashatooyinka, Dawladaha Hoose, Wakaaladaha Madaxa-Bannaan, iyo Shirkadaha Khaaska ah.

4) Dadka haysta dhulka badan xadka lagu sheegay qodobkan waxaa loo oggolaanayaa iney sii tabcadaan beerahooda muddo 2 sannadood ah oo laga billaabo taariikhda uu dhaqan galo Sharcigan.

9. *La wareegidda dhulka ka badan xadka loo gooyey*. — 1) Dhulka ka badan xadka lagu sheegey qaybta 1aad iyo tan 2aad qodobka 8aad waxaa 2 sannadood ka dib markuu dhaqan galo Sharcigan Wasaaradda Beeraha kula wareegeysaa Dekreeto uu soo saaro Xoghayaha.

2) Habka la wareegidda, iyo cidda bixineysa magdhowga xoolaha lala wareegaya waxaa lagu sheegi doonaa Xeer Nidaamiye Dawladeed.

10. *La wareegidda dhulka danta guud awgeed*. — 1) Dhulkasta oo beeran ama la beeri jiray waa loola wareegi karaa dan guud awgeed.

2) Habka la wareegidda dhulka danta guud iyo bixinta magdhowga waxaa lagu sheegi doonaa Xeer Nidaamiye Dawladeed.

11. *Dib u qaybinta dhulka*. — 1) Dhulka lala wareegey iyadoo la tixgelinayo qodobadda 9, 10, iyo 15 ee Sharcigan, waxaa dib loogu qaybinayaa beeraleyda aan dhulka haysan, Iskaashatooyinka ama Beeraha Dawladda.

2) Guddiyada Kacaanka ee Gobollada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka ayaa mas'uul ka ah hawsha ku saabsan dib u qaybinta dhulka.

12. *Waxyaalaha laga reebayo ruqsadda dhulka*. — 1) Ruqsadda dhulka lagu bixiyey Sharcigan waxaa ka reeban in cid kale loo wareejiyo, la iibiyo, ama la ijaaro.

2) Haddii qofka ruqsadda dhulka la siiyey uu gaaro dhaawac halis ah oo beertiisa beeri waayo, wuxuu beerta ku wareejin karaa Dawladda, ama ciddii dhaxaltooyadiisa lahayd.

3) Lama oggola kala goynta dhulka.

13. *Xuquuqda uu leeyahay qofka dhulka falaya wuxuu xaq u leeyahay*:

b) Dhanka wax qabashada:

1) Inuu dhulka beero kana soo saaro khayraadka dhulka ku jira.

2) Inuu beero dhirta waaweyn (perennial crops).

3) Inuu ku dhisto guri uu dego iyo dhisma kale oo loogu tala galay tacabka iyo horumarinta beerta.

4) Inuu dhulka xoolo ku dhaqdo iyo wixii ay xoolahaas u baahan yihiin.

5) Inuu ka qeyb galo Iskaashatooyinka Beeraha isagoo ku darsanaya dhulkiisa.

t) Dhanka Sharciga iyo Dhaqaalaha:

1) Xuquuqda sharci ahaan uu yeelanayo qofka xoolo loo siiyey inuu isticmaalo (diritto di godimento di un bene concesso per uso).

2) Wax allale wixii xuquuq ah oo sharcigan u oggolyahay oy ka mid yihiin inuu ku intifaaco wixii Khayraad ah oo ka soo baxa isagu yeesho.

3) Inuu xaq u leeyahay inuu daafaco xuquuqdiisa Maxkamadaha ama xafiisiyada kale ee Dawladda hortooda, kana, helaayo badbaadin iyo taageero sharci ahaan xaq u leeyahay iyadoon loo kala soocin xagga dhalashada muwaadiniimadiisa, diinta iyo wax alaale wixii u dhow midabtakoor.

4) Inuu qiimaheeda deyn kaga qaadan karo Bankiyada Dalka.

5) In lacagta ku baxday beerta iyo wixii la xiriira haddii dibedda ay ka timid, inuu xaq u yeelan karo, in lagu dhaqo sharciga lacag gelinta (legge sugli investimenti esteri) oo xaq u siinaya in qaar ka mid ah faa' iidada u ka helo beerta inuu dibadda u dirsan karo.

14. *Waajibaadka saaran qofka dhulka falaya*. — b) Qofka dhulka falaya waxaa saran waajibaadka hoos ku qoran:

1) Inuusan dhulka u isticmaalin si ka duwan shuruudii lagu siiyey.

2) Inuu dhulka u falo sida ugu fiican isagoo kordhinaya barwaaqeynta, kana soo saaraya tacabka ugu badan.

3) Inuusan qof kale u wareejin, iibin, ama cid kale ka ijaarin.

4) Inuusan kala goyn dhulka inta isticmaalka dhasab ka dhigayo ma ahane.

5) Inuu siiyo haddii ay jiraan shaqalaha u shaqeeya mushaar u qalma shaqadooda sida uu dhigayo sharciga, awoodna uma leh inuu ka qaado wax lacag ah (customary charges).

6) Inuu bixiyo canshuurta dhulka ee lagu sheegay sharcigan ama kuwa uu dhigi doono Xeer Nidaamiye Dawladeed.

t) Shuruuda siismada ruqsadda dhulka la falaayo, waxaa lagu Faah-Faahin doonaa Xeer-Nidaamiye Dawladeed.

15. *Ka qaadidda ruqsadda (concession) iyo beddelaadeeda*. — 1) Waxaa qofka ruqsadda dhulka looga qaadi karaa markii laga helo sababaha soo socda:

a) Markii ey Dawladdu dhulka la wareegto sida uu dhigayo qodobka 10 ee Sharcigan.

b) Marka qofka dhulka ku dhaqma uu sharcigan ama Xeer Nidaamiyihiisa ku xadgudbi.

t) Marka qofka dhulka ku dhaqma uu ka soo bixi waayo shurudaha lagu siiyey ruqsadda.

j) Marka qofka ruqsadda dhulka dhaxalka u heley uusan rabin inuu beero sida uu dhigayo qodobka 16 aad ee Sharcigan.

x) Marka qofka dhulka ku dhaqma uusan beerin ama uu isaga tago dhulkiisa laba sannadood ka dib markii la siiyey ruqsadda.

kh) Marka qofka dhulka ku dhaqma uu qof kale ku wareejiyo, ka iibiyo ama uu qof kale ka ijaaro ruqsadda sida uu dhigayo qodobka 12aad ee Sharcigan.

2) Waxaa cidda ruqsadda dhulka looga beddeli karaa markii ay Dawladda dhulka qaarkiisa la wareegto sida uu dhigayo qodobka 9aad ee Sharcigan.

3) Dhulka ruqsadda laga qaaday dib loo qaybinayaa sida uu dhigayo qod. 11aad ee Sharcigan.

16. *Dhaxalka* — 1) Marka uu dhinto qofka ruqsadda dhulka la siiyey, ruqsadda dhulka waxay ku wareegeysaa dadka dhaxalkiisa xaqa u leh (159 Xeerka Qoyska).

2) Markaasoo kale diiwanka dhulka ayaa lagu dhigayaa magacyada dadka dhaxalka u helay ruqsadda dhulka sida uu dhigayo Sharcigan.

3) Haddii dadka dhaxalka leh eysan rabin iney u beertaan dhulka sida ey dhigeyso shuruudii lagu siiyey ruqsadda dhulka qofkii dhintay, ruqsaddaas waa laga qaadayaa. dhulkana waxaa dib loogu qaybinayaa beeraleyda kale ee meeshaas deggan oo aan dhul haysan. Dadka loo qaybiyey dhulkaas ayaa u magdhabaya dadkii laga qaaday wixii kharaj ah ee uga baxay.

Qaybta III

Canshuurta iyo Kharajka kale

17. *Bixinta Canshuurta*. — 1) Qof kasta oo dhulka ku dhaqma waa inuu mar waliba bixiyaa canshuurta dhulka ee Dawladda iyo wixii kale oo canshuur ah ee Dhulka la saaro.

2) Canshuurta dhulka waxaa loo goynayaa hekter waliba sida dhulka uu u kala fiican yahay.

3) Shuruudda bixinta canshuurta iyo habka lagu bixiinayo waxaa lagu sheeg: doonaa Xeer Nidaamiye Dawladeed.

18. *Kharajka lagu hagaainayi dhulka*. — Dhulka ruqsadda lagu bixiyey haddii ey horey u hagaajisay Dawladda, Dawladaha Hoose ama Wakaaladaha Madaxa-Bannaan, kharajka waxaa bixinayaa qofkii ruqsadda dhulka la siiyey.

Qaybta IV

Diiwaangelin

19. *Diiwaangelinta dhulka*. — 1) Wasaaradda Beeraha waa iney leedahay diiwaan ku saabsan dhulka beeraha oo lagu qorayo dadka dhulka ku dhaqma magacyadooda iyo shuruudda lagu siiyey ruqsadda dhulka.

2) Wakiilka Degma waliba u jooga Wasaaradda Beeraha wuxuu diiwan gelinayaa dhulka beeraha ku yaala degmada.

3) Iyadoo la tixgelinayo sharcigan wixii lagu qorayo diiwanka dhulka waxaa saldhig u noqonaya ruqsadda dhulka, qoraal rasmi ah ama go'aan Maxka madeed ee ku saabsan dhulka.

4) Wixii lagu qorayo diiwaanka waa inay oggolaadaan Gudoomiyaha Kacaanka ee Degmada iyo Kormeeraha Beeraha ee Gobolka.

5) Markii la oggolaaday wixii lagu qoray diiwaanka dhulka, qofka dhulka ku dhaqma waxaa la siinayaa shahaado muujineysa wax allale wixii ku saabsan dhulka ruqsadda loo siiyey.

6) Wakiilka Wasaaradda Beeraha uu jooga Degmada wuxuu ugu dambeystii u gudbinayaa Wasaaradda Beeraha nuqul ku saabsan waxyaaJaha kor lagu sheegay.

20. *Fiirista iyo caddeyn diiwaanka dhulka*. — Cid kasta oo dan u leh wuxuu fiirin karaa diiwaanka dhulka saacadaha ay Xafiisyadu furan yihiin isagoo bixinayaa ajuuradda lagu sheegi doono Xeer Nidaamiyaha, haddii caddeeyn qoran ka doonaayo in la siiyo.

Qaybta V

Qodobka Isku Jira

21. *Ka reebidda dhulka nabadgelyada awgeed*. — Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo dhageystay ra'yiga Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Beeraha iyo taladii ay soo jeediyeen Hoghayaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo kan Gaashaandhigga, wuxuu ka reebi karaa dhul kasta in la beero nabadgelyada Qaranka awgeed isagoo soo saaraya dekereeto.

22. *Wareejinta awoodda*. — Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Beeraha wuxuu awoodiisa Sharcigaan siinayaa ku wareejin karaa Madaxa Wasaaradda Beeraha ee Gobollada iyo Degmooyinka.

23. *Ciqaabta.* — Qof kasta oo ku xadgudba Sharcigaan, waxaa lagu ciqaabayaa xarig laba sannadood ilaa toban sannadood ah ama gannaax lacageed oo ah So.Shs. 2.000 ilaa 10.000 ruqsadda dhulka la siiyeyna waa laga qaadayaa.

24. *Awood*. — Maxkamaddaha caadiga ah ayaa awood u leh iney qaado dacwooyinka ku saabsan Sharcigaan ee Dawladda dhinac ka ahayn .

25. *Xeer Nidaamiye Dawla*deed. — Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro Xeer Nidaamiye Dawladeed oo lagu fasiri dooni Sharcigaan, isagoo tixgelinaaya talada uu soo jeediyo Xoghayaha .

Qaybta VI

Qaybta Dambeysa

26. *Tirtir* — Waxaa la tirtirayaa Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon Karin Sharcigaan.

27. *Dhaqan gelin* – Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa taariikhda uu ku soo baxo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.